

WAA MAXAY MOSAIC?

MOSAIC waa hay'ad afaf (luuqado) badan, macaash doonna ahayn oo loo dhiso in ay ka caawiso dadka wadanka ku cusub baahidooda is-dhexgalka iyo dib u dajinta. Ayadoo qabanaysa adeegyo iyo barnaamijyo kala duwan, MOSAIC waxay ka caawisaa macaamiisheeda siday si buuxda uga qayb qaadan lahaayeen bulshada Kanada.

ADEEGYADA QOYSKA IYO CARRUURTA

604 254 9626
childfamily@mosaicbc.com

BARNAAMIYADA SHAQADA

604 254 0244
employmentprograms@mosaicbc.com

XARUMAHA AF INGIRIISKA

604 684 8825
linc@mosaicbc.com

ADEEGYADA TURJUMAADDA (AFKA)

604 254 8022
interpretations@mosaicbc.com

BARNAAMIYADA DAJINTA

604 254 9626
settlement@mosaicbc.com

ADEEGYADA KHAASKAA

604 254 9626
specializedservices@mosaicbc.com

ADEEGYADA TURJUMAADDA (QORAALKA)

604 254 0469
commercial@mosaicbc.com

WWW.MOSAICBC.COM

SAACADAHA & XARUNTA

Xarunta Soo-galootiga ee Carruurta iyo Qoysasku waxay ku taal is-goyska waddooyinka Edmonds/Kingsway, Burnaby

9:00 AM ilaa 4:30 PM



Waddooyinka Basaska

GALBEED U SOCDA
#106 Metrotown Station
#129 Metrotown Station

BARI U SOCDA
#106 New West Station
#129 Edmonds Station



MOSAIC

7009 Kingsway

Burnaby BC

V5E 1E5

604 636 0120



XARUNTA SOO-GALOOTIGA EE CARRUURTA IYO QOYSASKA



ADEEGGA CARRUURTA
YAR YAR EE KU AADAN
DAJINTA EE QOYSASKA
SOO-GALOOTIGA KU NOOL
BURNABY

IN KA BADAN 35 SANO OO AH
XOOJINTA SOO-GALOOTIGA IYO
QAXOOTIGA SI GACAN LOOGA GAYSTO
DHISMaha BULSHO WANAAGSAN

XARUNTA SOO-GALOOTIGA EE CARRUURTA IYO QOYSASKA



Xarunta Soo-galootiga ee Carruurta iyo Qoysasku waa meel soo dhoweyn iyo furfurnaansho qoys leh ayna booqdaan waaliddiinta/daryeelayaasha iyo carruurta soo-galootigu. Shaqaalaha xarunta ee taageeridda dajinta qoyska ee xirfadaha iyo furfurnaanta lehi waxay gacan ka siiyaan carruurta iyo qoysaskooda siday awood ugu yeelan lahaayeen qaadashada barnaamijyada iyo adeegyada caadiga. Xaruntu waxay leedahay jawi nasasho iyo raaxo leh, halkaasoo qoysasku ay kula kulmi karaan dad cusub, kana heli karaan teegeero iyo macluumaadka degaanka sanadaha hore iyo adeegyada bulshada kuwaasoo ka caawin kara siday u dagaal lahaayeen Kanada.

YAA XAQ-U-LEH?

Xarunta Soo-galootiga ee Carruurta iyo Qoysasku waxay soo dhoweysaa qoysaska qaxootiga Kanada ku cusub iyo dadka dagganaanshaha leh oo dhibaatooyin ka haystaan degaanka, lehna carruur da'doodu u dhexayso eber ilaa lix (0-6) sano kuna nool Burnaby.

ADEEGYADA ASTURAN (SIRTA AH)

- **Qolka Soo-dhoweynta iyo Kooxda Soo-galootigu** waxay siiyaan macluumaad iyo fursad ay kagala hadlaan korniinka hore ee carruurta, arrimaha caafimaadka iyo barbaarinta, ayagoo ku dhiirigalinaya ka qaybgalayaasha in ay horumariyaan aqoontooda afka Ingiriiska.
- **Kulamada macluumaadka iyo hawl qabashada waaliddiintu** waxay si midaysan u qabtaan baaritaan caafimaad, daryeelka hooyada uurka leh, kooxo xog is weydaarsi guud ku saabsan korniinka horee carruurta, barbaarinta, caafimaadka, nafaqada, farshaxanka iyo xirfadaha iyo jimicsi.



- **Barnaamijyada Hanuuninta ama Warbixinta ee Carruurta yar yar iyo kuwa Barbaradkaa** waxay gacan ka geystaan baahiyaha barbaarinta carruurta, si loogu diyaariyo iskuulada caadiga iyo kuwa barbaradkaa.
- **Jikada cunta barashadu** waxay bixisaa cunto iyo cabitaan fudud oo nafaqa leh iyo macluumaad ku saabsan cuntooyinka jaban ee nafaqada leh.
- **Barnaamijka iskaa wax u qabsadu** wuxuu waaliddiinta siiyaa fursado ay bulshadooda uga qayb-galaan kuna helaan xirfado cusub.

MAALGALIYAYAASHA

Xarunta Soo-galootiga ee Carruurta iyo Qoysku waxay xubin ka tahay qorshaha Mashruuca Tijaabada Qaxootiga Sanadaha Hore oo laga hirgaliyo lix beelood (Kumyuniti) oo ku yaal Nawaaxiga Vancouver. Mashruucan waxaa hoggaamiya MOSAIC. Adeegyada waxaa lagu qabtaa maalgalin iyo caawimaad ay iska kaashadeen:

Citizenship and Immigration Canada
Burnaby Early Childhood
Development Community Table
United Way of the Lower Mainland
Ministry of Children and Family
Development
Fraser Health Authority
Burnaby School District #41
City of Burnaby: Parks, Recreation
and Cultural Services and
Burnaby Public Library
S.U.C.C.E.S.S.
Immigrant Services Society of BC,
R.A.P.
Burnaby Family Life Institute
Burnaby Neighbourhood House
Family Services of Greater
Vancouver

Funded by:

Financé par :



Citizenship and
Immigration Canada

Citoyenneté et
Immigration Canada

